

## **Deeqda Barnaamijka Atlanta Falcons, NFL Foundation & Grassroots \$250,000 Lacag ku socoto Stone Mountain High Athletics**

“Waxaan nahay dugsi leh baahiyo qeexan, marka si aan u helno fursada aan ku bixinno qaar ka mid ah qalabka ciyaaraha ee heerka sare iyo illaha loogu talloagalay ardaydeena waa beddelaha ciyaarta,” waxaa yiri Michael Costa Maamule Dugsiga Sare Stone Mountain. “Waxay ila tahay in qof walba ku faraxsanyahay wax ku saabsan waxa soo socdo. Waxay jecel yihiin garoonkeena, laakiin qaar ka mid ah waxyaabaha kale ee noo suurto galeyso inaan helno, runtii waxay ka waaleysaa maankooda.”

Taasi waxay soo koobeysaa xamaasadda bulshada dugsiga ka dib markii Shirkadda Taageerada Waxqabadyada Deegaanka (*LISC*) ay u soo bandhigtay Dugsiga Sare Stone Mountain iyo Dugsiga Degmada DeKalb (*DCSD*) deeq dhan \$250,000. Deeqda waxaa lagu soo bandhigay xaflad ciyaarta hore ka ho inta aysan ku loolamin kubada cagta Stone Mountain iyo Redan Garoonka Hallford Stadium ee 25 ka Agoosto.

Deeqda la mid ah waxaa loo ansixiyay sida qeyb ka ah barnaamijka aasaasiga ah ee loo marayo LISC, oo ay bixiso maalgelinta Atlanta Falcons, National Football League (*NFL*) Aasaaska, iyo Barnaamijka NFL Grassroots si loo dhammeystiro sagxada macmalka ah ee garoonka kubada cagta ee Stone Mountain High. Lacagta ayaa sidoo kale loo isticmaalayaa in lagu soo iibiyo qalab cusub oo loogu talloagalay barnaamijka ciyaaraha fudud ee dugsiga.

Dale Royal, Agaasimaha Fulinta ee LISC Atlanta, iyo kooxda, Jewel Williams iyo Dominique Ellis, ayaa soo bandhigay jeeg jeesjees ah oo qadka dhexe ee Maamule Costa, Agaasimaha Ciyaaraha Douglas Dakin, iyo Guddoomiyaha Guddiga Waxbarashada ee Degmada DeKalb Mudane Dijon DaCosta Sr.

“Anigoo ku hadlaya magaca Guddiga Waxbarashada, waad ku mahadsantahay aasaaska u qoondaynta lacago si toos ah u saameynayo aqoonyahanadeena. Waxay ka dhigantahay in caalamka uu ogaado in bulshada iyo daneeyayaasha ay taageerayaan shaqada cajiibka ah ee degmadeena iyo aqoonyahanada,” waxaa yiri Mudane DaCosta, oo sidoo kale sameeyay shilin tuuris bilowga ka hor. “Tan waxay u ogolaaneysaa barnaamijka inuu kobco, balaarto, oo sii qalabka lagama maarmaanka ah iyo aqabyo barnaamijka kubada cagta iyo ciyaaraha.”

Maamule Costa wuxuu rajeynayaa illo cusub inay u hogaamineyso ka qeybqaadasho sare oo ciyaaraha ah iyo, haa, wax badan oo guulaha garoonka ah.

“Goolka ugu horeeyo wuxuu kordhinayay hanka dhaqanka iyo ruuxa dugsiga. Waxay ila tahay [deeqda] way caawineysaa, iyo guuleysiga midaas ayay la imaanaysaa,” waxaa yiri Maamule Costa.